



Farrintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 27, 2022

Ku socota: Xubnaha bulshada I/DD, hawl wadaagayaasha Qabiilka, iyo shaqaalaha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Kulanka macluumaadka cusub ee maalgelinta Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka ee soo socda

ODDS waxay martigelinaysaa kulan dhanka internet-ka ah Noofambar 22, 2022 laga bilaabo 2:00 ilaa 3:00 galabnimo si [Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka \(ARPA\)](#) loola wadaago macluumaadka cusub ee maalgelinta loogana hadlo su'aalaha. Hawl-wadaagayaasha bulshada ee daneynaya fursadahani maalgelineed waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay ka soo qayb galaan.

ODDS waxay dadka la wadaagi doontaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan shuruudaha deeqda lacageed, nidaamyada codsiga, shuruudaha warbixinta, iyo xaalada ay hadda ku sugan yihiin deeqaha lacageed ee kala duwan, iyo waxyaabo badan. Waxaa sidoo kale jiri doona waqti loogu talagalay su'aalaha.

Ka soo qayb gal adiga oo adeegsanaya macluumaadka Zoom ee hoose. Haddii aad u baahan tahay qorshayaal la sii diyaariyay, fadlan email u dir [employment.first@odhsosha.oregon.gov](mailto:employment.first@odhsosha.oregon.gov).

### **Ku soo biir Kulanka ZoomGov**

**Aqoonsiga Kulanka:** 161 822 0777

**Passcode-ka:** 520153

Soo wac adiga oo isticmaalaya goobtaada

+1 669 254 5252 US (San Jose)

+1 646 828 7666 US (New York)

Si loo hubiyo in aad diyaar u tahay in aad dalbato maalgelinta ARPA, fadlan isku diwaan geli [OregonBuys](#), kaasi oo ah nidaamka wax iibsiga elektarooniga ah ee gobolka. Faahfaahinta maalgelinta iyo codsiyada loogu talagalay fursadaha deeqda lacageed intooda badani waxay sii mari doonaan OregonBuys.

Ilaa taasi laga gaarayo, haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan ARPA, fadlan email u dir [ODDSARPA.funding@odhsoha.oregon.gov](mailto:ODDSARPA.funding@odhsoha.oregon.gov).

Waad ku mahadsantahay dulqaadkaaga inaga oo diyaarinayna maalgelintani aan hore loo arag ee loogu talagalay abaal marinta.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).